

Macluumaaad ku saabdan Koontada assaasiga ah



1. Qof kasta, oo ku jooga Sharci EU, waxuu Xaq u leeyhay, Koonto Assaasi ah inuu ka furto Bangida Austeriya

- Waxey ku xirantahay kaliya, inaad heesatid Dhalashada Wadan kamid ah Ururka EU ama Asbaab kale (sida.Qof Shaqaala ah ama Arday) oo Sharci ku joogo EU
- Xattaa Dadka aan Hoy laheen iyo Dadka Qaxootida ah Xaq ayay u leeyihii Koontada assaasiga ag.

2. Koontada assaasiga ah waxaad ka qaadan kartaa kaliya Lacagta kuugu jirta.

- Wuxaan awood u leedahay inaad Lacag ka qaadatid ama Kaarka Wax ku gadatid, haddii ey Lacag kuugu filan ku jirto Koontada.

3. Koontada assaasiga waxey lamid tahay Koontayada kale waxey uga duwan tahay kaliya inaad Lacag zaaíd ah ka qaadan karin

- Wuxaan awood u leedahay
 - Inaad Lacag Kaash ah ka qaadatid Bankiga ama kala soo baxdid Automaatiga,
 - Lacag inaad ku dirtid, Lacag joogta ah inaad ku bixisid sida Kirada iyo Lacag lagala baxo Koontada,
 - Kaarka Bangiga waxaad wax uga iibsan kartaa Dukaamada ama Interneetka,
 - Lacagtaada Online ayaad ka eegi kartaa.

4. Koontada assaasiga ah ma aha inuu ka batto qiimaheeda Sanadki 80,00€ taasi kuma xirna inta jeer aad Kaarka wax ku gadatid ama Lacag ku qaadatid.

5. Dadka , Lacag aad u yar heesta, ma aha Qiimaha Koontada assasiga ah iney ka badato 40,00€ Sanadki

- Dadkaas waxey yihii
 - Dadkaasi waa, Dad Dakhal soo gala (Mushaar, Lacagta Hawlkabka Lacagta Shaqo laáanta,Lacagta Cayrta) kuwaas oo heesta Sharci ahaan wax Noloshooda ku filan kaliya,
 - Dadka, laga daayay Kharajka Telefishinka iyo Raadiyaha,
 - Dadka, ku dhacday Khasaaro Shaqsiyeed
 - Qaxootida,
 - Dadka aan Hoy heesan.



konsumentenfragen.at



sozialministerium.at



facebook.at/sozialministerium

6. Haddii aad horey Austeriya Koonto Bangi ku laheed, waa Qasab inaad Koontada hore xirtaa.

- Haddii aad xiri weyso Koontada hore, waxuu Bangiga awood u leeyahay inuu kuu diido Koontada assasiga ah inuu kuu furo.
- Bangiga, aad Koontada ka furaneyso, waxaa Qasab ku ah haddii uu doonayo Qofka Koontada furanayo inuu ka shaqeeyo wareejinta Koontada.
- Haddii Koontadaada hore la xiray Dayn awgeed, markaas waxaad Xaq u leedahay ayadoon la xirin tii hore inaad Koonta assaasi ah laguu furo.
- Koontada assaasiga ah waxaad ka furan kartaa Baniga, Bangiga aad horey Koonto ku laheed, ama Bangiyada kale.

7. Koontada assaasiga ah waxuu kaa xirin karaa Bangiga haddii ey jiraan Asbaab gooni ah.

- Waxay suuro galtahay inlagaa xiro, haddii
 - haddii aad Koontada wax Dembi ah ku isticnaasho,
 - haddii Koontada la isticmaalin wax ka badan 24 Bilood
 - haddii aad furato Koonto kale

8. Faah faahin dheeraad ah ku saabsan Koontada assaasiga ah waxaad ka heleysaa Folder „Basiskonto – ein Konto für Sie“ und unter www.konsumentenfragen.at.

- Folderka waxaad dalban kartaa:
 - www.sozialministerium.at/broschuerenservice
 - mit E-Mail an broschuerenservice@sozialministerium.at
 - telefoon Nambarka +43 1 711 00-86 25 25.

IMPRESSUM:

Meediyyaha waxaa iska leh iyo soo saaray: Bundesministerium für Arbeit, Soziales und Konsumentenschutz, Stubenring 1, 1010 Wien • **Verlags- und Herstellungsort:** Wien • **Layout und Druck:** Sozialministerium
▪ **Stand:** Juli 2017